

Pandemic-EBT wuxuu ka caawiyaan qoysaska quudinta carruurtooda

Markii dugsiyada loo xiray aafada COVID-19 awgeed, boqolaal kun oo kamid ah ardayda Minnesota ah ayaa waayay quraacdii iyo qadadii ay ka heli jireen dugsiga. Waxay tani aad u saameysay helitaanka cuntada ee ardayda heli jirtay cuntada dugsiga ee bilaashka ah ama qiimaheeda la dhimay.

USDA waxay dhawaan ansixisay codsiga gobolka Minnesota ee Pandemic EBT (P-EBT) si looga caawiyo qoysaska inay daboolaan cuntada ay carruurtoodu ku wayday xiritaanka dugsiyada.



Maxaad helaysaa?

P-EBT waa lacag bixin hal mar ah taas oo ah \$325 ardaygiiba.

Yaa u qalma P-EBT?

Arday badan oo reer Minnesota ah ayaa u qalma. Qoysaska haysta carruurta da'doodu u dhaxayso 5-18 illaa iyo bisha Sebteembar. 1, 2019 ayaa u qalma P-EBT haddii dugsiga ilmahaagu uu u xidhan yahay COVID-19 awgii iyo:

Aad hore u heli jirtay SNAP ama Dheefaha MFIP illaa iyo bishii Maars 18, 2020; ama

Ilmahaagu uu heli jiray cuntada dugsiga ee bilaashka ah ama qiimaheeda la dhimay intii lagu jiray sannad dugsiyeedka 2019-2020;

Ama Ilmahaaga uu dhigto dugsi siiya cuntooyin bilaash ah dhammaan ardayda iyadoon loo eegayn dakhliga qoyska.

Sidee lagu helaa P-EBT?

P-EBT waxaa lagu bixinayaa laba qaab:

Qoysaska horeyba ugu jiray SNAP ama MFIP Maars 18, 2020 waxay horey u haysteen \$325/ilmihiiba taas oo ugu jirtay kaarkooda EBT.

Qoysaska hore u helayay cunto bilaash ah ama qiimaheeda la dhimay ama dhiganayay dugsi siiya cunto bilaash ah dhammaan ardayda **ayaa u baahan inay codsadaan P-EBT**.

ama Wuxuu helayay cunto bilaash ah ama qiimaheeda la dhimay ama dhiganayay dugsi siiya cunto bilaash ah dhammaan ardayda **ayaa u baahan inay codsadaan P-EBT**.



Sidee loo dalbadaa?

Ka codso onlayn <https://mn.p-ebt.org>.


Soo dhakhso! Codsiyada waa in la buuxiyaa kahor Luulyo 31, 2020!

Maxaa lagu iibsan karaa P-EBT?

Waxaad ku iibsan kartaa P-EBT isla waxyabaha aad ku iibsan jirtay dheefaha SNAP. Badi badeecoyinka cuntada waa lagu iibsan karaa:



Miraha iyo Khudaarta



Hilibka, Kallunka, Ukunta, iyo Caanaha



Badeecoyink a Malabka iyo Mabalka (Maple)



Jaam, Macmacaan, Qajaar, iyo Suugo



Badeecoyink a La Dubay



Iniinta iyo Dhirta Soo Saara Cuntada

Dheefahu waxay "dhacayaan" 365 maalmood kadib taariikhda la soo saaro.

Helitaanka P-EBT ma wuxuu iga dhigayaa qof qaata dheefaha kaabista dadweynaha?

Inkasta oo P-EBT ay adeegsato kaar lamid ah kan SNAP, haddana P-EBT MAAHA dheefaha SNAP loomana tixgeliyo inay tahay dheefaha kaabista dadweynaha.

Qoyskaygu ma heystaan khadka internetka ama kumbuyuutar. Ma gudbin karnaa codsi warqad ah?

Codsi *on/layn* ah waa in laga buuxiyaa mn.p-ebt.org inta u dhexeysa Juun 8, 2020, iyo Juulyo 31, 2020. La xiriir Khadka Tooska ah ee P-EBT 651-431-4050 ama 800-657-3698 si aad u hesho caawimo dheeri ah oo ku saabsan sida loo buuxiyo codsiga ama la xiriir Khadka Cuntada ee Minnesota si aad uga hesho caawimo 888-711-1151.

Qoyskaygu ma akhriyaan mana qoraan Ingiriisiga. Ma jiraa qof i caawin kara?

Waxaad la xiriiri kartaa Khadka Tooska ah ee P-EBT 651-431-4050 ama 800-657-3698 si lagaaga caawiyio tarjumaadda iyo/ama buuxinta codsiga.

Wali su'aalo ayaan qabaa. Xagee ayaan caawimo ka raadsadaa?

DHS waxay aasaastay Khadka Tooska ah ee P-EBT si wax looga jawaabo su'aalaha kaas oo shaqeyn doona Isniinta ilaa Jimcaha 8 subaxnimo ilaa 4 galabnimo Ka qeybgalayaasha su'aalaha qaba ayaa wici kara 651-431-4050 ama 800-657-3698 ama waxaad su'aalaha ku soo diri kartaa bogga internetka ee DHS.

Maclumaaad dheeri ah ayaa lagu baahiyay <https://mn.gov/dhs/p-ebt/>

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan P-EBT ama ilaha kale ee cuntada, waxaad wici kartaa Khadka Cuntada ee Minnesota 888-711-1151 Isniinta-Jimcaha 10:00 subaxnimo - 5: 00 pm Tarjubaanada taleefanka ayaa la heli karaa.